

# EARLY ACHIEVERS

Aqoonsiga Tayada Washington iyo Heerarka Tayada  
Nidaamka Hagaajinta iyo Shuruudaha



Washington State Department of  
**CHILDREN, YOUTH & FAMILIES**

---

DCYF ma takoorto waxayna usiisaa helitaan siman barnamijyadeeda jyo adeegyadeeda, dhamaan dadka iyadoon loo tixgalin isirka, midabka, jinsiga, diinta, caqiidada, xaalada guur, dhalashada, rabitaanka galmo, da'da, xaalad ciidan ama jiritaanka naafo jidheed, dareen ama maskaxeed.

Haddii aad rabto nuqullo dukumeenti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan kala xidhiidh DCYF Constituent Relations (Xidhiidhada Qaybaha) 1-800-723-4831 ama iimaylka [communications@dcyf.wa.gov](mailto:communications@dcyf.wa.gov).

DCYF PUBLICATION EPS\_0057SM (03-2023) SOMALI



## Halbeega Tayada iyo Shuruudaha Early Achievers

Halbeega Tayada Early Achievers waxay bixiyaan hab guud oo ah hababka ugu wanaagsan si loo aqoonsado, loo taageero, loona hagaajiyo tayada goobaha waxbarashada hore. Waxay saldhig u yihiin heerarka tayada xarunta. Khubarada aqoonsiga tayada waxay siiyan dhibco aqoonsi aag halbeeg kasta inta lagu jiro wareega aqoonsiga tayada. Shanta meelood ee Halbeega Tayada waa:

- Deegaanka waxbarashada
- Heerarka Koboca Carruurta
- Macaamilka iyo Manhajka
- Xiriirka iyo Iskaashiga Qoyska
- Horumarinta Xirfadda iyo Tababarka

Barnaamijyada waxbarashada hore waxay kugu siinayaan dhibco dhovr siyaabood. Dhamaan barnaamijyadu waa inay dhamaystiraan Qaab-muuqalka Barnaamijka oo ay soo gudbiyaan laba Qodob oo Fiidiyow Muhiim ah halkii fasalba si loo helo Heerka Tayada 3 ama ka sareeya. Dhibcaha lagu helay halbeeg kasta waxay go'aamiyaan aagaga takhasuska. Meelahaasi waxay muujinayaan awooda barnaamijka.

Dukumentigan wuxuu taxayaa Halbeega Tayada ee aag kasta, halbeegyada shuruudahaas, iyo tirada dhibcaha suurtogalka ah ee Halbeega Tayo kasta. La shaqee tababarahaaga oo u isticmaal dukumentigan hage ahaan aqoonsiga tayada ee Gobolka Washington.

# Halbeegyada Tayada Early Achievers: Kormeer

## Heerka Tayada 1

### Shaatiyaynta ama Xaqiijinta

Tan waxaa ka mid ah xarumaha daryeelka caruurta iyo daryeelka ilmaha guriga qoyska, iyo sidoo kale milatariga, qabiilka, Head Start, Early Childhood Education and Assistance Program (iyo Barnaamijyada Waxbarashada Caruurnimada Hore iyo Caawinta, ECEAP) Barnaamijka. Barnaamijyada waxbarashada hore waa inay iska diiwaangeliyan MERIT si ay uga qaybgalaan Early Achievers.



## Heerka Tayada 2


### Kobcinta Xirfadeed iyo Maareynta Barnaamijka

Heerka Tayada 2 waxaa loogu talagalay inuu ka caawiyo barnaamijyada waxbarashada hore inay fahmaan oo u diyaargaroobaan ka qaybgal guulaysta ee Early Achievers. Si loo dhamaystiro Heerka Tayada 2, barnaamijyadu waxay dhamaystiraan Qaab-muuqalka barnaamijka oo siinaya 20 dhibcood.

## Heerarka Tayada 3-5

### Qiimayn iyo Aqoonsi

Barnaamijyada waxbarashada hore ee doorta inay raacaan Heerarka Tayada 3-5 waxay kasban doonaan dhibco iyagoo soo gudbinaya Muuqaalada Muhiimka ah Codsi Heer Tayo. Heerarka tayada kama dambaysta ah waxaa lagu go'aamiyaa tirada dhibcaha laga helay qaybaha Heerka Tayada.





## Goobaha Heerka Tayada Early Achievers

### Deegaanka waxbarashada

#### 55 DHIBCOOD

Ka qaybgalayaasha waxaa la siiyaa dhibco aqoonsi marka ay dhammaystiraan qaybaha hoose. Qaybaha Aqoonsiga:

- Borofaylka Barnaamijka – 20 dhibcood
- Soo Koobitaamka Fiidiyaha – 5 dhibcood halkii fidiyawba (illaa 30 dhibcood)
- Fiidiyowga Da'da Dugsiga – 5 dhibcood

### Heerka Koboca Carruurta

#### 20 DHIBCOOD

- Baadh carruurta si aad u ogaato dhacdooyinka horumarineed iyo walaacyada suurtogalka ah.
- Bixi qiimeyn socota si aad wax uga barato ilma kasta awoodiisa iyo baahidiisa iyo barashada shaqsiyeed.
- La wadaag macluumaadka ku saabsan koritaanka carruurta iyo horumarka qoysaska si kor loogu qaado u diyaargarowga dugsiga.

### Macaamilka iyo Manhajka

#### 10 DHIBCOOD

- Hirgelinta manhaj waafaqsan Tilmaamaha Waxbarashada Hore iyo Horumarinta ee Gobolka Washington.
- Sii taageero shaqaalaha si loo hagaajiyo manhajka iyo isdhexgalka macallinka iyo ilmaha.

### Xiriirkha iyo Iskaashiga Qoyska

#### 10 DHIBCOOD

- Iskaashi la sameeya qoysaska si loo go'aamiyo aragtida awoodda iyo baahiyaha ilmaha.
- Samee Qorshe Hawleed, oo ku salaysan cilmi-baaris ku salaysan Xoojinta Qaababka Ilaalinta Qoysaska.

### Horumarinta Xirfadda iyo Tababarka

#### 10 DHIBCOOD

Barnaamijka waxbarashadaa hore iyo shaqaalaha waxbaridda waxay xaqiijiyeen shahaadooyinka Early Childhood Education (Waxbarashada Carruurnimada Hore, ECE) ama shahaadooyinka, la-halmaalayaasha, heerka koobaad ee jamacadeed, ama shahaadooyinka Heerka Labaad ee jaamacada ee ECE ama DCYF oo oggolaaday oo lagu diiwaangeliyey MERIT.

### Aqoonsiga

#### 10 DHIBCOOD

- Soo gudbi Codsiga Shahaadada Aqoonsiga.
- U soo gudbi caddayn ahaan shahaado hadda ama dukumentiyo kale oo sheegaya in xarunta ay si buuxda u aqoonsatay hay'ad buuxisay shuruudaha aqoonsiga Early Achievers.
- Aqoonsigu waa inuu ansax noqdaa taariikhda la soo gudbiyay codsiga Aqoonsiga.

# Heerka Tayada Early Achievers

La cusboonaysiya Abril 2021

## Deegaanka waxbarashada

CABIRA	SHURUUDAH A HEERKA	DHIBCO
Xogta Barnaamijka	Dhamaystir waraysiyo ama xog -waraysiyo lala yeesho agaasimaha barnaamijka ama milkiilaha FCC, hoggaamiyeasha macallimiinta (oo ay ku jiraan Fursadaha Waxbarashada La Fidiyay) iyo qoysaska.	20
Soo koobitaanka Fiidiyowga	Cashar kasta oo fasalka ah wuxuu soo gudbiyaa fidyaw mid ka mid ah aagagga Tilmaamaha Waxbarashadaa Hore iyo Horumarinta.	5
	Cashar kasta oo fasalka ah wuxuu soo gudbiyaa fidyaw mid ka mid ah aagagga Tilmaamaha Waxbarashadaa Hore iyo Horumarinta ee horay loo soo gudbiyay.	5
	Cashar kasta oo fasalka ah wuxuu soo gudbiyaa fidyaw mid ka mid ah aagagga Tilmaamaha Waxbarashadaa Hore iyo Horumarinta ee horay loo soo gudbiyay.	5
	Cashar kasta oo fasalka ah wuxuu soo gudbiyaa fidyaw mid ka mid ah aagagga Tilmaamaha Waxbarashadaa Hore iyo Horumarinta ee horay loo soo gudbiyay.	5
	Cashar kasta oo fasalka ah wuxuu soo gudbiyaa fidyaw mid ka mid ah aagagga Tilmaamaha Waxbarashadaa Hore iyo Horumarinta ee horay loo soo gudbiyay.	5
	Cashar kasta oo fasalka ah wuxuu soo gudbiyaa fidyaw mid ka mid ah aagagga Tilmaamaha Waxbarashadaa Hore iyo Horumarinta ee horay loo soo gudbiyay.	5
	U soo gudbi hal fidiyow fasal kasta ama fadhi kasta oo leh carruurta da'da iskuulka ee ka diiwaangashan qaybaha fidiyaha Fursadaha Waxbarashada La Fidiyay.	5
DHIBCAHA GUUD EE DEGAANKA WAXBARASHADA		55



# Heerka Tayada Early Achievers

## Heerarka Koboca Carruurta

	HEERKA	SHURUUDAH A HEERKA	DHIBCO
BAARITAAN	<b>Baaritaanka 1</b> Nidaamku wuxuu hubinayaa in dhammaan carruurta dhasha illaa gelitaanka xannaanada lagu baaro aaladda baarista koriinka oo ansax ah oo la isku halleyn karo.	Siyaasadda waxaa ka mid ah: <ul style="list-style-type: none"> <li>Magaca aaladda baarista koriinka ee saxda ah.</li> <li>Nidaamyada ku saabsan sida carruurta loo baari doono 45 maalmood gudahood kadib marka ugu horeysa ee ay ka qeybgalaan barnaamijka.</li> </ul>	1
		Siyaasadda waxaa ka mid ah: Dib u baarista waxay dhici doontaa sannad walba.	1
		Xeerka waxaa ka mid ah: Sida bixiyaha isku dayi doono inuu ku baaro luuqadda guriga ee ilmaha.	1
QIIMAYNTA SOCOTA	<b>Baaraanka 2</b> Natijjooyinka baaritaanka saxda ah waxaa lala wadaagaa qoysaska.	Xeerka waxaa ka mid ah: Sida natijjooyinka baaritaanka loola wadaagi doono dhammaan qoysaska.	1
		Xeerka waxaa ka mid ah: Sida natijjooyinka baaritaanka loola wadaagi doono dhammaan qoysaska luqadooda.	2
QIIMAYNTA SOCOTA	<b>Qiimaynta Socota 1</b> Siyaasaddu waxay xaqiijinaysaa in dhammaan carruurta dhasha illaa gelitaanka xanaanada ay helaan qiimayn rasmi ah ama indho -indhayn aan rasmi ahayn iyo dukumiintiyo ugu yaraan saddex jeer sannadkii (tusaale, faylalka carruurta ama qiimaynta taxliilinta shaqada).	Siyaasadda waxaa ka mid ah: <ul style="list-style-type: none"> <li>Magaca(yada) qiimaynta rasmiga ah iyo nooca kormeerka iyo dokumentiga ilmaha la isticmaalay.</li> <li>Hababka qiimaynta, oo ay ku jiraan inta jeer ee la sameeyo.</li> </ul>	2
	<b>Qiimaynta Socota 2</b> Kormeer aan rasmi ahayn oo socda iyo dokumentiyo ayaa ku jira faylka dhammaan carruurta.	Siyaasadda waxaa ka mid ah: Kormeer aan rasmi ahayn oo socda iyo dokumentiyo ayaa loo qabtaa dhammaan carruurta ka qaybgashay barnaamijka ugu yaraan 90 maalmood oo taariikh ah.	2
	<b>Qiimaynta Socota 3</b> Xaruntu waxay isticmaashaa aalad qiimayn rasmi ah oo la jaanqaadaya WaKIDS.	Qalabka qiimeyntan rasmiga ah ee lagu isticmaalay qiimeynta WaKIDS AMA qalabka waafajinta WaKIDS ee la dhameystiray waxay ku jiraan faylka qiimeyn kasta oo lagu sameeyey barnaamijka.	2
	<b>Qiimaynta Socota 4</b> WaKIDS ama aaladda wafaqsan qiimaynta rasmiga ah ayaa faylka ugu jirta dhammaan carruurta.	Siyaasadda waxaa ka mid ah: WaKIDS ama qiimeyn rasmi ah oo la isku raacsan yahay ayaa loo qabtaa dhammaan carruurta ka qeybgashay barnaamijka ugu yaraan 90 maalmood; taariikhaha waa in lagu daraa.	2

# Heerka Tayada Early Achievers

## Natijjada Ilhama (Sii Socda)

	HEERKA	SHURUUDAH HEERKA	DHIBCO
QIIMAYNTA SOCOTA	<b>Qiimaynta Socota 5</b> Ugu yaraan hal macallin hoggaamiye fasal kasta ayaa lagu tababaray laguna kalsoonaan karo WaKIDS ama qalab qiimayn oo rasmi ah. Haddii aan loo baahnayn tababar rasmi ah ama la heli karo aaladda qiimaynta, markaa caddaynta ugu yaraan afar saacadood oo ah tababar guud ee qiimeynta ayaa loo baahan yahay.	Ugu yaraan hal macallin hoggaamiye fasal kasta ayaa lagu tababaray laguna kalsoonaan karo WaKIDS ama qalab qiimayn oo rasmi ah. Haddii aan loo baahnayn tababar rasmi ah ama la heli karo aaladda qiimaynta, markaa caddaynta ugu yaraan afar saacadood oo ah tababar guud ee qiimeynta ayaa loo baahan yahay.	1
	<b>Qiimaynta Socota 6</b> La wadaag qiimaynta ilmaha ama macluumaadka kormeerka qoyska.	Siyaasadda waxaa ka mid ah: Sida natijjooyinka qiimaynta rasmiga ah ee carruurta ama indho-indhayn aan rasmi ahayn iyo dukumentiyada loola wadaago qoysaskooda ugu yaraan laba jeer sannadkii.  Siyaasadda waxaa ka mid ah: Sida natijjooyinka qiimaynta rasmiga ah ee carruurta ama indho-indhayn aan rasmi ahayn iyo dukumentiyada loola wadaago qoysaskooda ugu yaraan saddex jeer sannadkii.	1 2
SHAKHSIYAYNTA	<b>Shakhsiyaynta 1</b> Siyaasaddu waxay u habaynaysaa waxbaridda dhammaan carruurta.	Siyaasadda waxaa ka mid ah: Sida hadafyada loo horumarin doono dhammaan carruurta iyadoo lagu saleynayo natijjooyinka qiimeynta rasmiga ah iyo indho-indheynta aan rasmiga ahayn iyo dukumentiyada.	1
		Siyaasadda waxaa ka mid ah: Sida barnamijiyadu ula wadaagi doonaan qoysaska si loo horumariyo yoolalka shaqsiyed ee carruurtooda. (Tusaale ahaan, hogamiyayaasha barnamijiku waxay samayn karaan xogwaraysi qoran ama waxay la yeelan karaan qoysaska kulamo si ay u bartaan awoodaha iyo baahiyaha ilmaha.)	1
NATIIJADA CUNUGA DHIBCAHA GUUD			20



# Heerka Tayada Early Achievers

## Macaamilka iyo Manhajka

	HEERKA	SHURUUDAH HEERKA	DHIBCO
MANHAJKA	<b>MANHAJKA 1</b> Manhajka loo isticmaalo fasal kasta iyo koox walba waxay la jaanqaadayaan Tilmaamaha Barashada Hore ee WA ama waxay ku jiraan liiska manaahijita isku dhafan.	Manhajka fasal kasta iyo koox kasta oo da' ah ayaa ku jira liiska manaahijita isku jira ama la jaanqaada Tilmaamaha Barashada Hore ee Gobolka Washington iyadoo la adeegsanayo curricular alignment tool (aaladda waafaqsan manhajka, CAT).	2
	<b>MANHAJKA 2</b> Ugu yaraan hal macallin hoggaamiye ama macallin hoggaamiye FCC fasal kasta ayaa lagu tababaray manhajka ee ay adeegsanaya. Tababarkaasi wuxuu buuxiyey shuruudaha manhajka gaarka ah. Haddii aan loo baahnayn ama la heli karin tababar rasmi ah, markaa macallinka hoggaamiyaha ahi waa inuu haystaa caddayn ugu yaraan tababar afar saacadood ah oo ku saabsan manhajka. Caddaynta waxaa ku jiri kara shahaado tababar ama xaashida galitaanka ee ku qoran casharka tababarka.	2	
HOGAAMINTA TILMAAMTA LEH	<b>Hogaaminta Tilmaamta leh ee 1</b> Hogaamiyayaasha barnaamijka barashada hore waxay sannad walba siyaan job-embedded professional development (horumarin xirfadeed shaqo ku xiran shaqaalaha, JEPD) macallimiinta hoggaamiya si loo hagaajiyo manhajka iyo isdhexgalka macallinka iyo ilmaha	Hoggaamiyayaasha barnaamijka barashada hore waxay sannad walba siyaan job-embedded professional development (horumarin xirfadeed shaqo ku xiran shaqaalaha, JEPD) macallimiinta hoggaamiya si loo hagaajiyo manhajka iyo isdhexgalka macallinka iyo ilmaha.  Xeeladaha JEPD waa in lagu saleeyaa hababka waxbaridda ee maalinlaha ah. Macallimiintu waa inay qiimeeyaan oo helaan xalal qayb ka ah geedi socodka hormarinta joogtada ah. Tababarkani wuxuu dhici karaa waxyar ka hor, inta lagu guda jiro, ama ka dib marka la sameeyo tababarka. JEPD waxaa ku jiri kara hagitaan, taageero hal-qof ah, tababbrro adeegyo dhexdooda ah oo leh taageero dabagal ah si loo meelmariyo, kooxaha barashada aasaaga, ama warcelin ka timaadda kormeer.  Ruqsadalah daryeelka carruurta qoyska ee aan kormeerin shaqaalaha ayaa iskaashi la samayn kara bixiyeyaasha kale ee aaggooda JEPD.  Caddaynta waa inay ku jiraan magacyada macallimiinta iyo taariikhaha. Kaliya caddaynta sannadkii kalandarka ee la soo dhaafay ayaa la tixgelinaya.	1
	<b>Hogaaminta Tilmaamta leh ee 2</b> Hogaamiyayaasha barnaamijka barashada hore waxay bixiyaan job-embedded professional development (horumarin xirfadeed oo ku salaysan shaqada) jiraan shaqaalaha macallinka hoggaamiya ugu yaraan saddex jeer sannadkii. Tababarkan wuxuu hormarin doonaa manhajka iyo isdhexgalka macallinka iyo ilmaha.	Hoggaamiyayaasha barnaamijka barashada hore waxay bixiyaan job-embedded professional development (horumarin xirfadeed shaqo ku xiran shaqaalaha, JEPD) macallinka hoggaamiya ugu yaraan saddex jeer sannadkii. Tababarkan wuxuu hormarin doonaa manhajka iyo isdhexgalka macallinka iyo ilmaha.  Ruqsadalah daryeelka carruurta qoyska ee aan kormeerin shaqaalaha ayaa iskaashi la samayn kara bixiyeyaasha kale ee aaggooda JEPD.  Caddaynta waa inay ku jiraan magacyada macallimiinta iyo taariikhaha. Kaliya caddaynta sannadkii kalandarka ee la soo dhaafay ayaa la tixgelinaya.	1
	<b>Hogaaminta Tilmaamta leh ee 3</b> Hogaamiyayaasha barnaamijka barashada hore waxay sannad walba siyaan job-embedded professional development (horumarin xirfadeed shaqo ku xiran shaqaalaha, JEPD) macallimiinta hoggaamiya si loo hagaajiyo manhajka iyo isdhexgalka macallinka iyo ilmaha.	Hoggaamiyayaasha barnaamijka barashada hore waxay sannad walba bixiyaan job-embedded professional development (horumarin xirfadeed shaqo ku xiran shaqaalaha, JEPD) A ku xiran shaqaalaha macallimiinta hoggaamiya si loo hagaajiyo manhajka iyo isdhexgalka macallinka iyo ilmaha.  Ruqsadalah daryeelka carruurta qoyska ee aan kormeerin shaqaalaha ayaa iskaashi la samayn kara bixiyeyaasha kale ee aaggooda JEPD.  Caddaynta waa inay ku jiraan magacyada macallimiinta iyo taariikhaha. Kaliya caddaynta sannadkii kalandarka ee la soo dhaafay ayaa la tixgelinaya.	1

# Heerka Tayada Early Achievers

## Isdhexgalka iyo Manhajka (Sii socda)

	HEERKA	SHURUUDAH A HEERKA	DHIBCO
KA HORTAGGA HAKINTA IYO ERYIDDA	<b>Ka hortagga Hakinta iyo Eryidda 1</b> Syaasaddu waxay taageertaa carruurta leh dabeecad adag iyo baahiyiyo horumarineed iyada oo loo marayo iskaashiga qoyska, tababarka shaqaalaha, iyo wadatashiga.	Syaasadda waxaa ka mid ah sida shaqaaluhu ula shaqeeyaan qoysaska si ay u abuuraan una dejiyaan qorshe taageero dabeecadeed oo loogu talagalay carruurta ay dabeecadaha adagi sii jiraan.	1
	<b>Ka hortagga Hakinta iyo Eryidda 2</b> Shaqaaluhu waxay leeyihiin tababar sannadle ah si ay u taageeraan kobcinta bulsheed iyo shucuureed oo wanaagsan, yaraynta dabeecadaha adag iyo daryeelka in uu qofka dhaawac maskaxeed gaarin.	Syaasadda waxaa kamid ah habraacyada tababarka shaqaalaha sannadlahu ah si loo taageero horumarka bulsho iyo shucuureed ee wanaagsan, yaraynta dabeecadaha adag iyo daryeelka wargelinta dhaawac maskaxeed.	1
	<b>Ka hortagga Hakinta iyo Eryidda 3</b> Shaqaaluhu waxay la tashan karaan la-taliye caafimaad maskaxeed, tababare ama xirfadle kale oo ku saabsan tabashooinka habdhaqanka ama koritaanka.	Syaasadda waxaa ka mid ah qorshayaal lagula xiriirayo la-taliyaha caafimaadka dhimirka, tababare, ama xirfadle kale oo ku saabsan tabashooinka habdhaqanka ama koritaanka.	1

MACAAMILKA IYO MANHAJKA DHIBCAHA GUUD

10



# Heerka Tayada Early Achievers

## Xiriirka iyo Iskaashiga Qoyska

	HEERKA	SHURUUDAH HEERKA	DHIBCO
XOOJINTA IYO TAAGEERIDA QOYSASKA	<b>Xoojinta iyo Taageerida Qoysaska 1</b>  Qorshaha hawlgelinta ka-qaybgalka qoysku wuxuu diiwaangeliyaa yoolalka loogu talagalay taageeridda qoysaska iyadoo lagu saleynayo Xoojinta Qoysaska ama is-qiimeyn u dhiganta.	Hadafyadu waxay ku qoran yihii qorshe hawleedka ka qaybgalka qoyska oo ku taariikhaysan sannad dugsiyeedka la soo dhaafay. Taariikhda la sameeyay qorshe hawleedka waa in la diiwaangeliyaa.	2
	<b>Xoojinta iyo Taageerida Qoysaska 2</b>  Qor dokumentiyada ku saabsan yoolalka qorshaha waxqabadka qoyska.	Caddaynta horumarka laga gaadhay hadafyada qorshaha waxqabad ee ka qaybgalka qoyska ayaa ku jira faylka. Taariikhaha waa in lagu daraa. Tusaalooyinka caddaynta waxaa ka mid noqon kara: <ul style="list-style-type: none"> <li>Marti qaadka xaflad qoys si loo gaaro hadaf lagu kordhinayo ka qaybgalka qoyska.</li> <li>Nuqlu ka mid ah warsidaha oo ku qoran luuqado badan si hadafka loo kordhiyo isgaarsiinta luuqadaha guriga.</li> <li>Shax telefoon si loogu xiro qoysaska.</li> </ul>	2
	<b>Xoojinta iyo Taageerida Qoysaska 3</b>  Muuji cadaymaha ahdaafta la dhammaystiray ee qorshaha waxqabad ee hawlgelinta qoyska.	Caddaynta milicsiga yoolalka la dhammaystiray ee qorshaha waxqabadka ka qaybgalka qoyska ayaa ku jira faylka. Tusaalooyinka caddaynta waxaa ka mid noqon kara: <ul style="list-style-type: none"> <li>Milicsiga sida dhacdada qoysku u dhacday iyo saamaynta ay ku leedahay ka qaybgalka qoyska.</li> <li>Warcelinta waalidka ee warsidaha luuqadaha badan leh iyo tallaabooyinka xiga.</li> <li>Dib -u -milicsiga sida geedka taleefanku u shaqaynayo iyo tallaabooyinka xiga ee lagu hagaajinayo shaxda taleefanka.</li> </ul>	2
GUDBITAANKA	<b>Gudbitaanka 1</b>  Cadeynta siyaasada waxaa loogu talagalay dhammaan gudbitaanka ku habboon.	Siyaasadda ama qorshaha qoran ayaa faahfaahinaya sida barnaamijka waxbarashada hore u taageero carruurta iyada oo loo marayo gudbitaanka soo socda: <ul style="list-style-type: none"> <li>U gudubka barnaamijka waxbarashada hore.</li> <li>Ka gudbitaanka barnaamijka waxbarashada hore (fasallada dhexdooda, haddii ay khuseyso).</li> </ul>	2
	<b>Gudbitaanka 2</b>  Cadeynta siyaasadu waa u diyaar kala guurka barbaarinna ama barnaamijka cusub.	Siyaasadda waxaa ka mid ah: Sida qoysaska loo taageero marka ilmahoodu u gudbayo barnaamij cusub ama xannaanada. Tan waxaa ku jira wargelinta ku saabsan barnaamijka cusub ama diiwaangelinta xannaanada ama hawlahaa jiheynta ee bulshada deegaanka.	2

XIRIIRKA IYO ISKAASHIGA QOYNSKA DHIBCAHA GUUD

10

# Heerka Tayada Early Achievers

## Horumarinta Xirfadda iyo Tababarka

	HEERKA	SHRUUDEHA HEERKA	DHIBCO
XARUNTA SHAQAALAH	Agaasimaha xarunta ama kormeeraha barnamijka ayaa leh waxbarasho u qalanta oo lagu xaqiijiyay MERIT. Tirada dhibcaha la helay waxay ku saleysan tahay heerka waxbarashada ugu sareeya ee uu gaaray Agaasimaha, Kalkaliyaha Agaasimaha ama Kormeeraha Agaasimaha.	Agaasimaha ama Kormeeraha Barnamijku wuxuu buuxiyey mid ka mida shuruudahan soo socda: <ul style="list-style-type: none"> <li>1 dhobic: ECE shahaadada gobolka ama u wax dhigma</li> <li>2 dhibcood: AA dhanka ECE ama qeyb la xiriirta*</li> <li>3 dhibcood: BA dhanka ECE ama qeyb la xiriirta*</li> <li>4 dhibcood: MA ama ECE sare ama qeyb la xiriirta*</li> </ul>	4
	Hogaanka iyo kalkaliyayaasha macalimiinta ee xarunta ayaa leh waxbarasho u qalanta oo lagu xaqiijiyay MERIT. Tirada dhibcaha la helay waxay ku saleysan tahay celceliska tirada dhibcaha ay heleen 25% shaqaalaha waxbarashada ee heerarka ugu sareeya ee waxbarashada.	Dhibcaha ugu danbeeya waxa go'aamin doona celceliska tirada dhibcaha ay heleen 25% ugu sareeye shaqaalaha waxbarashada (hogaanka iyo kalkaliyayaasha macalimiinta). <ul style="list-style-type: none"> <li>2 dhibcood: Shahaadada koobaad ama wax u dhigma</li> <li>3 dhibcood: Shahaadada kooban ama wax u dhigma</li> <li>4 dhibcood: Shahaadada gobolka ama wax u dhigma</li> <li>5 dhibcood: AA dhanka ECE ama wax u dhigma*</li> <li>6 dhibcood: BA ama ECE sare ama wax u dhigma*</li> </ul>	6
HORUMARINTA XIRFADLAHA IYO TABABBARKA XARUNTA SHAQAALAH XARUNTA WADARTA DHIBCAHA			10

	HEERKA	SHRUUDEHA HEERKA	DHIBCO
FAMILY CHILD CARE (DARYEELKA CARRIERTA QOYSKA)	Baraha xanaanada cunugga qoyska ama shaqaalaha aasaasiga ah ayaa leh waxbarasho u qalanta oo lagu xaqiijiyay MERIT. Tirada dhibcaha la helay waxay ku saleysan tahay heerka ugu sareeya ee waxbarashada ay heleen Family Child Care Licensee (Liisan-haysta Daryeelka Cunuga Qoyska), Adeeg-bixiyaha, Xaqlaha, ama Shaqaalaha Koobaad.	Dhibcaha ugu danbeeya waxa go'aamin doona celceliska tirada dhibcaha ay heleen 25% ugu sareeye shaqaalaha waxbarashada (hogaanka iyo kalkaliyayaasha macalimiinta). <ul style="list-style-type: none"> <li>2 dhibcood: Shahaadada koobaad ama wax u dhigma</li> <li>3 dhibcood: Shahaadada kooban ama wax u dhigma</li> <li>4 dhibcood: Shahaadada gobolka ama wax u dhigma</li> <li>6 dhibcood: AA dhanka ECE ama qeyb la xiriirta*</li> <li>8 dhibcood: BA dhanka ECE ama qeyb la xiriirta*</li> <li>10 dhibcood: MA ama ECE sare ama wax u dhigma*</li> </ul>	10
HORUMARINTA XIRFADLAHA IYO TABABBARKA XARUNTA SHAQAALAH XARUNTA WADARTA DHIBCAHA			10

\*Shahaadooyinka aan ku jirin goobta ECE ee aan lagu lammaanin aqoonsiga Montessori ee la ansixiyay waxaa loo xisaabin doonaa inay leeyihiiin heer waxbarasho oo ka hooseeya shahaadada ECE. MA goob aan la xidhiidhin, tusaale ahaan, waxay u dhigantaa BA ee ECE, halka AA goob aan xidhiidh la lahayn ay la mid tahay Shahaadada Gobolka. MA ee goob aan xiriir la lahayn oo ay la socoto aqoonsiga Montessori ee la ansixiyay ayaa loo arkaa mid u dhigma MA ee ECE.

## Aqoonsiga (Ikhtiyaari)

	HEERKA	SHRUUDEHA HEERKA	DHIBCO
AQOONSIGA	Barnaamijka waxaa si buuxda u aqoonsan hay'ad la aqoonsan yahay.	Barnaamijku wuxuu hadda haystaa aqoonsi ay hay'ad si rasmi ah u aqoonsatay Early Achievers (tusaale ahaan, shahaadada aqoonsiga hadda ee faylka ku jira).	10
DHIBCAHA GUUD EE AQOONSIGA			10